

Branch:	Case number:	Worker ID:
Case name:		



Warbixinta Isbeddelka

Hayso qoraalkaan si aad u isticmaasho mustaqbalka.

Wuxuu sharraxayaa waxa loo baahan yahay in la soo sheego.

Waa in aad wixii isbeddel ah ku soo sheegto 10 maalmood gudahooda bilawga isbeddelka

Sida foomkaan loo isticmaalo

- Waxaad Istimasha foomkan si aad u soo gudbiso wixii isbeddel ah ee la xiriira gargaarada cuntada ee Barnaamijka Gargaarka Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP), Gargaarka Ku Meel Gaarka ah ee Qoysaska Baahan (TANF) ee lacagta iyo caafimaadka.
- Waxaad soo raacisaa wax caddeynaya isbeddelka dakhliga.
- Waxaad buuxisaa oo kaliya qaybaha qeexaya isbeddeladaada.
- Fadlan saxiix taariikhda ku qor foomka.

Haddii uu isbeddelka saameynayo gargaarkaaga, Waaxda Adeegyada Dadweynaha ee Oregon (ODHS) waxay kuu soo diri doontaa ogeysiis. Caadi ahaan waxaanu isbeddelka sameynaa bisha ku xigta marka aad soo gudbiso isbeddelka. Foomkan waxaad ku soo dirtaa boosto, ama xafiiska keen ama waxaad isbeddelka u soo sheegtaa shaqaalaha kiiskaaga qaabilsan.

Waxyaabaha La soo sheegayo

- Isbeddelada la xiriira dadka qoyska ka tirsan (haddii uu qof guursado, aqalka ka guuro ama u soo guuro).
- Haddii uu qof shaqo bilaabo ama joojiyo.
- Isbeddelada kale ee ku saabsan meesha laga helo dakhliga la filayo in uu sii socdo (marka qof ay u billaabato in uu helo ama ka joogsato masruufka carruurta, SSI, gargaarka shaqo la'aanta, iwm.)
- Tani way isbeddelaysa marka ay noqoto tirada dakhliga:
 - ▶ Wixii ku saabsan SNAP iyo TANF, waxaad soo sheegtaa wixii isbeddel ah ee ka badan \$100 bishii ee dakhliga laga helo shaqada.
 - ▶ Wixii ku saaban SNAP iyo TANF, waxaad soo sheegtaa wixii isbeddel ah ee ka badan \$50 bishii ee dakhliga aan shaqo laga helin.
 - ▶ Wixii ku saaban SNAP, waxaad soo sheegtaa bakhtiyaanasiibka iyo khamaarka lagu guuleystay ee dhan

\$3,500 ama ka badan.

- ▶ Wixii ku saabsan gargaarada caafimaadka, waxaad soo sheegtaa wixii isbeddelo ah ee cadadka nooc kasta oo dakhli ah.
- ▶ Shaqaalaynta la Xiriirta Daryeelka Carruurta (ERDC) waxaad soo sheegtaa wixii isbeddel ah ee la xiriira ODHS 0862.
- Isbeddelka cinwaanka (wixii ku saabsan SNAP, waxaad fadlan soo raacisaa kirada cusub iyo kharashyada biilasha aad bixiso).
- Isbeddel ku saabsan go'aanka maxkamadda ee lagu bixiyo masruufka carruurta.
- Isbeddelada la xiriira tirada lacagta caddaanka ah, kaydka, xisaabta socota ama waxyaabaha kale ee qiimaha leh.
- Haddii u qof iibsado, iibiyo ama iska beddelo gaadiid.
- Wixii ku saabsan gargaarada caafimaadka, haddii aad hesho ama lumiso caymiska caafimaadka (tani waxaa ka mid ah caymiska shaqada ay bixiyaan).
- **Wixii ku saabsan gargaarada SNAP, haddii aad ku nooshahay Degaanka Benton, Clackamas, Clatsop, Deschutes, Jackson, Lane, Linn, Marion, Multnomah, Polk, Tillamook, Washington ama Yamhill, waa in aad soo sheegto marka saacadaha shaqadu ay hoos uga dhacaan 20 saacadood toddobaadkii. Shaqadu waxay noqon kartaa shaqada lacag la qaadanayo, shaqada aan lacagta la qaadanayn ama wax lagu bedelanayo. Wax is dhaafsigu waa shaqada lagu beddelanayo adeeg, sida iyadoo loo shaqaynayo si lacagta ijaarka loo dhimo. Isbeddelkan waxaad kaliya soo sheegtaa haddii qofka shaqaynaya ay da'diisu u dhaxayso 18 ilaa 49 oo aanu jirin ilme ay da'diisu ka yar tahay 18 jir oo guriga jooga.**
- Wixii ku saabsan gargaarka caafimaadka ama TANF, marka uu jiro uur cusub iyo marka uur lahaanshuhu dhamaado.
- Wixii ku saabsan TANF, isbeddelada ku yimaada kooxdii dalbanaysa. Tani waxaa ka mid ah marka la guursanayo ama la isfurayo ama haddii ilmahaaga 18 jirka ah u joojiyo aadida dugsiga sare ama wixii u dhigma. Haddii aad hayso su'aalo ku saabsan in tani ay ku khusayso, waydii shaqaalahaaga.

Siyaasaddayada ku saabsan takoorida

Waaxda Adeegyada Dadwaynaha (ODHS) qofna takoori mayso. Tani macnaheedu waa in ODHS ay taageeri doonto cida u qalanta oo ayna qofna si kale ula dhaqmi doonin sobobtoo ah da'da, asalka, midabka, dal laga soo jeeda, jinsiyada, diinta, siyaasada la aaminsan yahay,¹ naafanimada ama dookha galmo.

Waxaad gudbin kartaa cabasho haddii aad u malaynayso in ODHS sababahan midkood kuu takoortay.

Si aad gobolka cabasho ugu gudbiso, waxaad waci kartaa Xafiiska Qareenka Gudoomiyaha Gobolka 1-800-442-5238 (TTY 711) ama qoraal u dir xafiiskooda:

Governor's Advocacy Office
500 Summer Street NE, E17
Salem, OR 97301

Email-ka: GAO.info@odhs.oregon.gov

Sida ku cad sharciga federaalka ee sharciga xuquuqda dadweynaha iyo xeerarka iyo siyaasadaha u yaala xuquuqda dadweynaha ee Waaxda Beeraha ee Maraykanka (USDA), waaxdani waxay mamnuucaysaa kala takoorida la xiriirta jinsiyada, midabka, dalka laga soo jeedo, lab ama dheddig, (oo ay ku jiraan is-aqoonsigaaga qof ahaaneed iyo dookha galmo), caqiiqada diimeed, naafanimada, da'da, siyaasada la aaminsan yahay,¹ ama aargoosiga ama aargushado oo loogu talagalay hawlaha xuquuqda dadweynaha oo hore.

Macluumaadka barnaamijka waxaa suuragal ah in ay jiraan iyagoo ku qoran luqaddo aan ka ahayn Ingiriisiga. Dadka naafada ah ee u baahan noocyo kale oo isgaarsiin si ay u helaan macluumaadka barnaamijka (tusaale, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee Braille, farta waaweyn, cajalada la duubo, Luqadda Calaamadaha ee Maraykanka), waa in ay la xiriiraan hay'ada (gobolka ama degaanka) halka ay ka dalbadeen gargaarada Shakhsiyaadka aan dhagaha wax ka maqlin, aanan si fiican wax u maqli karin, ama dhibaato hadal qaba waxay la xiriiri karaan USDA iyagoo isticmaalaya Adeega Gudbinta ee Dawladda Dhexe 'Federal Relay Service' 800-877-8339.

Si aad cabasho kala takoorida barnaamijka u gudbiso, Qofka cabanayaa waa in uu buuxiyaa Foomka AD-3027, Foomka Barnaamijka Cabashada Kala takoorida ee USDA kaasi oo laga helo kari internet-ka: <https://www.usda.gov/sites/default/files/documents/ad-3027.pdf>, oo laga helayo xafiis kasta oo ay leedahay USDA, iyada oo la wacayo 833-620-1071, ama iyada oo la qorayo warqad lagu hagaajo USDA. Warqadu waa in ay ka koobnaataa magaca, cinwaanka, lambarka telefoon, sharraxaad qoran ee ficilka kala takoorida ee la isku soo eedeeyay oo ku qoran faahfaahin ku filan si loogu wargeliyo Kaaliyaha Xoghayaha ee Xuquuqda Madaniga ah (ASCR) oo ku saabsan xaalada iyo taariikhda xadgudubka xuquuqda madaniga ah ee la isku soo eedeeyay. Foomka la buuxiyay ee AD-3027 ama warqada waa in loo gudbiyaa:

Boosta:

Food and Nutrition Service, USDA
1320 Braddock Place, Room 334
Alexandria, VA 22314; ama

Fax-ka: 833-256-1665 ama 202-690-7442; ama

Email-ka: FNSCivilRightsComplaints@usda.gov

Waaxdani waa fursad shaqo bixiye loo wada siman yahay

¹Macaamiisha SNAP way ka dhawran yihiin wixii kala sooc aaminsanaan siyaasadeed ah.

Branch:	Case number:	Worker ID:
Case name:		

Warbixinta Isbeddelka

Guriga

Haddii aad guurtay, waxaad buuxisaa qaybta hoose.

Cinwaanka cusub ee guriga:	Magaalada:	ZIP code-ka:	Taariikhda la guuray:	Kirada//lacagta iibka guriga ee cusub: \$
Cinwaanka boostada ee cusub (haddii uu ka duwan yahay):	Magaalada:	ZIP code-ka:	Lambarka cusub ee telefoonka:	Guriga miyaa la wadaagaa: Haa Maya

Adeegyada 'utilities'

Miyaaad guriga cusub bixisaa kharashka guriga lagu kululeeyo ee aan kirada ku jirin? Haa Maya

Haddii ay jawaabtu maya tahay, waa maxay biilasha aad bixiso? _____

Ma cid baa bixisa qayb ama kharashyada oo idil? Haa Maya

Haddii jawaabtu haa tahay, waa qofma? _____ Imisa ayay bixiyaan? _____

Bulshada

Ma ku nooshahay mid ka mid ah kuwo soo socda?

Dhul ay Maamulaan Hindida Maraykanku Haa Maya
Haddii ay jawaabtu haa tahay, waa kee? _____

Bulshada Hindida ku Tiirsan (sida Celilo Village) Haa Maya
Haddii ay jawaabtu haa tahay, waa kee? _____

Dhulka Hindida Maraykanka loo Qoondeeyay Haa Maya
Haddii ay jawaabtu haa tahay, waa kee? _____

Dakhliga

Miyuu jiraa qof ay shaqo lacag ka soo gasho? (Ardayda: waxaad raacisaan dakhliga shaqada waxbarashada) Haa Maya

Haddii ay jawaabta haa tahay, waxaad buuxisaa inta hoose adigoo ku soo lifaaqaya waxyaabaha isbeddelka caddeynaya.

Haddii uu qofka iskiisa u shaqeeyo, waxaad calaamadeysaa halkaan	Shaqada 1-aad	Shaqada 2-aad	Shaqada 3-aad
Magaca shakhsiga(yada) shaqeeya:			
Magaca shaqada ama shirkadda:			
Telefoonka shirkadda:			
Magaca shaqada:			
Taariikhda ay shaqadu billaabatay.			
Mushaharka haatan ee saacaddii:	\$	\$	\$
Saacadaha haatan ee toddobaadkii:			
Lacagta abaalgudka ee toddobaadkii:	\$	\$	\$

Haddii aadan qaadan mushaharka saacaddii, ama haddii aad hesho dakhliga saacadaha dheeraadka ah, gunno ama dallaal, halkaan ku sharrax:

Haddii ay wax iska beddeleen qof dakhligiisa (aan ka ahayn shaqada) ama ay wax iska beddeli doonaan, waxaad fadlan ku sharraxdaa halka hoose adigoo soo raacinaya wixii caddeyn ah. Dakhliga qaarkiisa wuxuu noqon karaa:

- Lacagta shaqo la'aanta la qaato
- Lacagta ardayga ee dugsiiga
- Masruufka carruurta
- Magdhawga shaqaalaha
- Ammaanada
- Amaahda
- Bakhtiyaanasiibka iyo/ama khamaarka lagu guuleystay
- Social Security-ga/SSI
- Gunnada hawlgabka
- Lacagta laga helo qoyska/ saaxiibo
- Ciidanka

Cidda la siiyo	Cidda la siiyay	Asalka dakhliga:	Joogtada dakhliga la bixiyey	La dalbaday ama haatan la qaato	Inta ay tahay qayb kasta oo la siiyo
				La Dalbaday La Qaato	
				La Dalbaday La Qaato	
				La Dalbaday La Qaato	

Haddii uu dakhliga billawdo, taariikhda ay lacag bixinta billaabatay: _____

Haddii uu dakhliga joogsado, taariikhda lacag bixinta ugu dambeysay: _____

Sababta dakhligu u joogsanayo? _____

Wixii ku saabsan gargaarada SNAP, haddii aad ku nooshahay Degaanka Benton, Clackamas, Clatsop, Deschutes, Jackson, Lane, Linn, Marion, Multnomah, Polk, Tillamook, Washington ama Yamhill, waa in aad soo sheegto marka saacadaha shaqadu ay hoos uga dhacaan (kuwa lacagtooda lagu siiyay ama aan lagu siin) 20 saacadood toddobaadkii ee dadka da'doodu u dhaxayso 18 ilaa 49 oo aanu jirin ilme ay da'diisu ka yar tahay 18 jir oo guriga jooga.

Magaca qofka	Saacadaha toddobaadkii la shaqeeyo	Magaca qofka	Saacadaha toddobaadkii la shaqeeyo

Shaqada tabaruca ah

Kaliya wixii ku saabsan SNAP, haddii aad ku nooshahay Degaanka Benton, Clackamas, Clatsop, Deschutes, Jackson, Lane, Linn, Marion, Multnomah, Polk, Tillamook, Washington ama Yamhill, ma jiraan dad qoyskaaga ka tirsan oo tabaruc ahaan u shaqeeya?

Magaca qofka tabaruca u shaqeeya	Saacadaha toddobaadkii la shaqeeyo	Magaca qofka tabaruca u shaqeeya	Saacadaha toddobaadkii la shaqeeyo

Xubnaha ka tirsan qoyska

Waxaad soo sheegtaa cid kasta oo aqalka ka guurta ama u soo guurta. Haddii dadka soo guurayaa ay helayaan dakhli, waxaad ku sheegtaa bogga xiga.

Maaha in aad in aad bixiso lambarka Social Security-ga ee xubnaha ka tirsan qoyska ee aan dooneynin gargaarada.**

	Qofka 1aad		Qofka 2aad		Qofka 3aad	
	Soo degay	Guuray	Soo degay	Guuray	Soo degay	Guuray
Taariikhda (la soo degay ama la guuray):						
Qofka guuray:						
Taariikhda dhalashada:						
Lambarka Social Security-ga**:						

	Qofka 1aad	Qofka 2aad	Qofka 3aad
Xiriirka idinka dhexeeya:			
Jinsiga:	Lab Dheddig	Lab Dheddig	Lab Dheddig
Muwaadin Maraykan ah:	Haa Maya	Haa Maya	Haa Maya
Arday miyaa:	Haa Maya	Haa Maya	Haa Maya
Gargaar miyaad doonaysaa:	Haa Maya	Haa Maya	Haa Maya
Cuntada miyaad wada iibsataan isla markaana sameysataan:	Haa Maya	Haa Maya	Haa Maya
Gobol kale laga helay TANF tan iyo 1996-kii:	Haa Maya	Haa Maya	Haa Maya

Hantida

Haddii ay wax iska beddelaan lacagta caddaanka ah, lacagta kaydka ah iyo hantida, waxaad hoos ku qortaa tirada haraaga ah.

Noocyada hantida	Lacagta	Lambarka koontada	Goobta/sharraxaadda
Xisaabta socota ee bangiga:			
Xisaabta kaydka ee bangiga:			
Kuwa kale (<i>Sharraxaad ka bixi. Tusaalooyinka: saamiyada shirkadaha, amaahda shirkadaha la siiyo, shahaadada kaydka lacagta ee muddada ku dhisan, xisaabaadka hawlgabka ee shakhsiga, iwm.</i>):			
Lacagta caddaanka ah ee la haysto:			

Haddii uu qof iibsado, iibiyo ama iska beddelo baabuurta sida kuwa soo socda, waxaad buuxisaa qaybta hoose.

- Baabuurta caadiga ah
- Gaadiidka weyn
- Basaska
- Mootooyinka
- Doomaha ama qalabka biyaha lagu dul maro
- Teendhooyinka dalxiiska ‘campers’ ama guryaha guur guura ‘trailers’

Nooca baabuurka la iibsaday:	Nooca:	Sanadka:	Lacagta lagu iibsaday: \$	Magaca mulkiilaha cusub:
Nooca gaariga la iibiyey ama la iska beddelay:	Nooca:	Sanadka:	Lacagta lagu iibiyey: \$	Alaabta lagu beddeshay:

Isbeddelada kale

Maxaa kaloo dhacay?? Waxaad buuxisaa qaybta hoose si aad u soo sheegto isbeddelada aan halkaan ku jirin.

Tusaalooyinka qaarkood waa:

- Caymiska caafimaadka dheeraadka ah ama la lumiyay
- Lambarka telefoonka cusub
- Isbeddelada kale ee la doonayo in aad soo sheegto
- Wax kasta oo kale ee aad doonayso in aad soo sheegto

Sharrax. _____

Haddii aadan isku diiwaan gelin in aad codayso halka aad hada ku nooshahay, ma rabtaa in aad maanta isku diiwaan geliso codaynta? Haa Maya

Codsiga isku isdiiwaan gelinta, ama diidmada isku isdiiwaan gelinta, in aad codkaaga dhiibato saamayn kuma yeelanayo taageerada ay ku siin doonto waaxdani.

Saxiixaaga:

Saxiixa foomkaan, anigoo ogsoon ciqaabta ku saabsan been abuurka, waxaan caddeynayaa in aan bixiyey warbixin sax ah ee dhammeystiran. In aan fahmay in warbixinta been abuurka ah ama warbixinta la qariyo ay ii keenayso ciqaab heer gobol iyo heer qaran. Waan akhriyey foomkaan waana fahmay. Waxaan caddeynayaa in aan si daacad ah u sheegay jinsiyaddeyda iyo qof kasta ee 18 sano ka yar ee aan gargaarka u codsanayo. Kani waa mid sharciga waafaqsan.

Magac daabacan, saxiixa iyo telefoon lambarka

Taariikhda

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso oo lacag la'aan ah. ONE Customer Service Center kala xiriir Oregon. Benefits@odhsoha.oregon.gov ama 1-800-699-9075 (cod/qoraal). Waan aqbalnaa wicitaanada gudbinta oo dhan.